

## SHAQADA QOYSKA IYO DARYEELAHA:

Sibteembar 2020

Taageerida Ardayda Barata Ingiriiska ee Da'yarta ah ayadoo la adeegsanaayo Buugaagta Wax lagu qoro

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

*Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES*

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Ujeedada shaqadaan waa in looga caawiyo carruurta inay hormariyaan xirfadahooda wax qorista iyo luuqada ayagoo yeelanaaya jadwalka wax qorista oo ay ku jiraan ka hadalka waxa ay qoreen waxna qoraaya maalin kasta. Waxaad taageeri doontaa cunugaaga si uu u qoro fikradhiisa, dareemadiisa, ra'yiyada, iyo erayada cusub asagoo adeegsanaaya buuga wax lagu qoro.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku hadalka iyo qorista luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga barashada Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!



### Maxaa diirada loo saarayaa hadalka iyo wax qorista?

Carruurta ayaa xoojiya luuqadooda hadalka iyo qoraalka marka ay qof la hadlayaan kahor, inta lagu jiro, iyo kadib wax qorista.

**Yoolka Waxbarashada:** Carruurta waxay dhisi doonaan xirfadahooda luuqada hadalka iyo qoraalka.

**Buundooyinka:** Fasalka 2aad–5aad

**Agabka:** Buugga wax lagu qoro ama waraaq, qalin qori ama qalin

### Aan biloowno!

Raac tallaabooyinka soo socda. Ka fiiri dhabarka danbe si aad u hesho taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada si aad uga caawiso cunugaaga inuu noqdo qoraa guulaysta.

#### Talaabada 1 aad: Nidaaminta Fikradaha Qoraalka

- Waxaa jira tiro badan oo sababaha kaladuwan ah oo aan qoraal u qori karno! Ka caawi cunugaaga **xulashada ujeedada qoraalkiisa**, sida inuu jeego sheeko ama uu qeexo dhacdo maalintiisa dhacday.
- **Qorshee fikradaha waawayn iyo qodobada muhiimka ah** ee cunugaagu qoraalka ku dari karo.
- **Ka hadal eray bixin gaar ah ama luuqad** cunugaagu adeegsan karo. Tusaale, waraaq saaxiibtinimo ayaa badanaa ku bilaabata *Gacaliye* \_\_ waxaana lagusoo diraa *Saaxiibkaa*, \_\_. Luuqad isku xiraysa fikradaha waxay noqon kartaa jumlad sida *Waxa soo socda ayaa kaa yaabin doona*, ama cunugaaga ayaa adeegsan kara erayada qodobaynta sheekada sida *koobaad, labaad, xigga*, ama *kadib*.

#### Talaabada 2 aad: Waqtiga Qoraalka

- Ku dhiiri geli cunugaaga **inuu si madax banaan wax u qoro**.
- **Lasoco marar kaladuwan** si aad u hubiso inuu guul ka gaaray shaqada wax qorista.

#### Talaabada 3 aad: Ka dooda Wax Qorista

- Dhammaadka maalinta ama marka qoraalku dhamaado, **ka codso cunugaaga inuu kula wadaago waxa uu qoray**
- **Cunugaaga kala sheekayso waxa uu qoray** iyo fikradaha, erayada cusub iyo luuqada aad kala hadasho hadda kahor inuu wax ka qoro. Tusaale, wax ka waydii fikirka uu dhibka ku qabay inuu qorala ka sameeyo. Ka hadal waxa cunugaagu inta badan ku faano, qayta uu aad u jecel yahay. (See *Taageerada Luuqada Si loo Caawiyo Imaha Qoraalka Kadib*).

## Taageerooyinka Caawimada Ilmahaaga *Kahor* Wax Qorista

### Fikradaha Qoraalka Madaxa banaan

- Qor waraaq saaxiibtinimo
- U sheeg buug aad akhriday, ama sheeko aad maqashay
- Samee sheeko
- Uga waran shaqo aad jeceshahay samaynteeda
- Qoraal ka samee meel aad jeceshahay inaad aado iyo sababta
- Dib u xisaabi wixii ugu shactirada badnaa/ugu cabsida badnaa/ugu layaabka badnaa ee kugu dhacay dhawaan
- Qeex awood xad dhaaf ah ood rabto iyo sababta aad u rabto

### Qaababka cunugaagu U diyaarsho Qoraalka

- Sii meel uu cunugaagu wax ku qoro
- Kala hadal cunugaaga waxa uu qorshaynaayo inuu sawiro ama qoraal ka sameeyo
- Ku boori cunugaaga inuu sawiro ama fikrad ama sheeko
- Jil fikir ama sheeko adoo kaashanaaya cunugaaga



## Taageerooyinka Luuqada si aad u caawiso Cunugaaga *Kadib* Wax Qorista

### Qaababka Fikir Looga Dhiibto Cunugaaga

- Qoraalkaaga Kor u Akhri Ma adeegsatay dhammaan fikradahaaga iyo erayadaada cusub?
- Ma jiray wax kugu adkaa inaad qorto?
- Ma jirtaa jumlad u muuqatay inay aad u dheerayd?
- Fikradahaagu ma isku xiran yihiin mana nidaamsan yihiin?
- Ma ku dari kartaa faahfaahin si aad qoraalkaaga uga dhigto mid xiiso leh?

### Qaababka Cunugaagu Ku Xoojin Karo Luuqadiisa Markuu Ka hadlaayo Qoraalka

Maanta waxaan qoraal ka sameeyay \_\_\_\_\_.

Waxaan doortay mawduucaan waayo \_\_\_\_\_.

Hal wax oon sameeyay si aan ugu diyaar garoobo wax qorista ayaa ah \_\_\_\_\_.

Qaar kamid ah erayada cusub ama jumlooyinka aan adeegsaday waa \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_.

Qaybtaan kamid ah qoraalkayga ayaa adkayd waayo \_\_\_\_\_.

Waxaan si gaar ah ugu faanayaa qaybtaan shaqadayda kamid ah waayo \_\_\_\_\_.

Hal qayb oo qoraalkayga kamid ah oon doonaayo inaan kula wadaago waa \_\_\_\_\_.